Casharka 20

1. Inkastoo farcankeennii hore ay Ilaah diideen, miyaa Ilaah qorshihiisii nabaadiinada ee ahaa inuu Badbaadiye soo diro ka tanaasulay?
-Maya.

2. Maaddaama kuwo badan oo farcankeennii hore ahaa ay diideen Ilaah, kuma ayuu Ilaah u doortay inuu ka soo bixin doono Badbaadiyaha?
-Aabraam.

3. Miyaa Ilaah doortay Aabraam iyoadoo ay ugu wacan tahay in Aabraam aanu dembaabin?
-Maya.
-Aabraam dembi buu ku dhashay.

4. Maxaa Ilaah Aabraam u doortay?
-Aabaam wuxuu rumaystay in dembiyadiisu u qalmeen dhimasho.
-Aabraam wuxuu kaloo rumaysnaa in Ilaah keliya uu isaga badbaadin karo.
Aabraam wuxuu rumaysnaa in Ilaah soo diray Badbaadiyaha.

5. Aabraam wuxuu guursaday Saaray. Imisa carruur ah ayey lahaayeen?
-Carruur ma lahayn.

6. Waa maxay sababta keentay in Aabraam iyo Saaray aanay carruur yeelanin?
-Waxaa ugu wacnaa in Saaray ay madhalays ahayd.

7. Maxaa Ilaah u sheegay Aabraam inuu sameeyo?



-Ilaah wuxuu Aabraam ku yiri ka tag waddankaaga, oo waxaad tagtaa halka aan ku geyn doono.

8. Ilaah wuxuu Aabraam kula hadlay Codkiisa. Sidee baa haddaba ilaah maant ainoola hadlaa innaga?
-Maanta, wuxuu Ilaah inagula hadlaa sida badan kitaabkiisa Baybalka.

9. Maxa Ilaah ka ballan qaaday Aabraam?
-Marka kowaad, Ilaah wuxuu Aabraam ka ballanqaaday inuu heli doono farac isaga ka iman doona oo noqon doona quruumo waaweyn.
-Tan labaad, Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu Aabraam baakadayn doono.
-Tan saddexaad, Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu barakadayn doono mid waliba ee Ibraahim u duceeya, iyo inuu habaari doono mid waliba ee Ibraahim habaara.
-Tan afraad, Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu dadka oo dhan ku barakadayn doono mid ka soo bixi doona faraca Ibraahim.

10. Muxuu noqonayaa kan Ibaahim ka soo farcami doono, oo dadka oodhan ay ku barakoobi doonaan?
-Waa Badbaadiyaha.

11. Muxuu Badbaadiyuhu samayn doonaa?
-Badbaadiyaha wuxuu u ima  doonaa inu ka takhaluso awoodda Shayddaanka.
-Badbaadiyaha wuxuu u iman doonaa oo kale inuu ka takhaluso awoodda dhimashada.
-Waxaa kaloo Badbaadiyuhu u iman doonaa inuu ka takhaluso awoodda Shayddaanka.
-Badbaadiyuhu wuxuu u iman doonaa inuu dadka iyo Ilaah isku

keeno.

12. Miyaa Ibraahim rumaystay ballammadii Ilaah?
-Haa.

13. Markii Ilaah Aabraam ballan siiyey, maxaa Ibraahim sameeyey?
-Aabraam wuxuu ka tegey halkii uu ku noolaa, oo wuxuu Ilaah u raacay dalka uu ku hoggaaminayo.

14. Halkee buu haddaba Ilaah ku hoggaamiyey Aabraam?
-Ilaah wuxuu Aabraam ku hoggaamiyey dhul cusub oo loo yaqaannay dhulkii reer Kancaan.

-Miyaad xusuusataa kan Luut ahaa?
-Luut wuxuu ahaawiil Aabraam adeer u yahay, kaasoo Aabraam u raacay Kancaan.

-Maalin, ayaa Abraam iyo Luut dhibaato soo dhex-gashay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 13:5-7

5-Oo Luut, oo isna Aabraam la socday, wuxuu lahaa adhi, iyo lo', iyo teendhooyin.
6-Dhulkuna ma uu qaadi karin iyagii, hadday wada degganaan lahaayeen: wayao, xoolahoodu way badnaayeen, oo sidaas daraddeed ma aya wada degganaan karin.
7-Dirir baana ku dhex jirtay xoolojirradii Aabraam iyo xoolojirradii Luut. Markaasna reer Kancaan iyo reer Feris dhulkaasay degganaaeen.

-Maxay ahayd dhibaatadii dhex martay Luut iyo Aabraam?



-Aabraam wuxuu lahaa ido iyo lo' badan.
-Luutna wuxuu lahaa ido iyo lo' badan.

-Waayo Luut iyo Aabraam labadaba waxay lahaayeen ari iyo lo' badan, oo markii xoolahooa laysku daro, dhib badnaa in la helo goof kuwa da filan xoolahooda.

-Muxuu ahaa fikirkii Aabraam si dhibaatada looga shaqeeyo?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 13:8-9

8-Oo Aabraam wuxuu Luut ku yidhi, Waxaan kaa baryayaa inaan diriru inaga dhex dhicin aniga iyo adiga, iyo xoolojirradayda iyo xoolojirradaada; maxaa yeelay, waxaynu nahay walaalo.
9-Dhulka oo dhammu sow kaama horreeyo? Waxaan kaa baryayaa inaad iga guurtid. Haddaad bidixda tagto, midigtaan tegayaa; haddaad midigta tagtona, bidixdaan tegayaa.

-Aabraam waxay la ahayd ama la wanaagsanaatay in isaga iyo Luutna ay kala guuraan.

-Aabraam wuxuu jeclaystay in marka hore Luut doorto dhulka la wanaagsan, dabadeedna isagu wuxuu qaadanayaa dhulka u soo hara oo wuxuu u guurayaa buuraha.

-Haddii Luut doorto inuu buuraha u guuro, markaa Aabraam wuxuu dooranayaa inuu soo aado dhulka hoose.

-Aynu eegno haddaba wixii Luut doortay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 13:10-11

10-Kolkaasuu Luut indhihiisii kor u taagay, oo wuxuu arkay Bannaankii Webi Urudun oodhan, iyo inay meel waluba aad u wanaagsan tahay, intaan Rabbigu baab'in Sodom iyo Gomora. Wuxuu u ekaa beertii Ilaah, iyo sida dalka Masar markaad tagto xagga Socar.

11-Markaasuu luut wuxuu doortay Bannaankii Urudun oodhan; oo Luut xagga bari buu u socdaalay; oo way kala guureen.

-Luut wuxuu doortay inuu dhulka hoose dego.

-Maxaa sabab u ah oo Luut u doortay inuu dhulka hoose ku noolaado?

-Waayo waxaa halkaas ku yiillay doog badan oo looda iyo iduhuba u daaqaan.

-Luut wuxuu ka fakarayey barrinka doogga leh.
-Luut wuxuu kaloo ka fikirayey idihiisa badan iyo loodiisa.
-Luut wuxuu kaloo ka fikirayey hodantinnimadiisa.

-Luut wuxuu sameeyey doorasho aan habboonayn markii uu qaatay dhulkii hoose.

-Waa maxay sababta Luut ugu khaldamay doorashadiisii?

-Waayo Luut Ilaah ma uusan weyddiisan waxa la sameeyo.
-Waayo Luut wuxuu diiday inuu Ilaah maqlo.

-Qaabiil wuxuu diiday inuu dhegaysto Ilaah, oo wuxuu dilay walaalkiis Haabiil.

-Qaabiil farcankiisii waxay diideen inay Ilaah maqlaan.



-Markaasaa waxaa baaba'ay faracii Qaabiil, oo waxay ku wada baaba'een daadkii weynaa.

-Maxaa haddaba dhacaya haddii aynu diidno inaan Ilaah maqalno?

-Haddii aynu diidno inaan codka Ilaah maqalno, waannu dhimanaynaa.

-Haddii aynu diidno inaan codka Ilaah maqalno, waxaannu gelaynaa Harada dabka ah ee Ilaah u diyaariyey Shayddaanka iyo jinniyadiisa.

-Miaa ido badan iyo lo' iyo hodantinnimo inaga badbaadinaysaa Harada dabka ah?
-Maya.

-Luut wuxuu diiday inuu maqlo Ilaah, wuxuuna soo degay dhulka hoose ee berrimada ama googagka wanaagsanaa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 13:12-13

12-Aabraam wuxuu degay dalkii Kancaan, Luutna wuxuu degay magaalooyinkii Bannaanka ku yiiil, oo teendhadiisii wuxuu u wareejiyey xagga Sodom.

13-Haddaba dadkii Sodom shar miidhan bay ahaayeen, Ilaahna aad iyo aad bay ugu dembaabeen.

-Dhulka hoose waxaa ku yiillay laba caasimadood.

-Magacyada caasimadaha waxay kala ahayaeen Sodom iyo Gomorrah.

-Dadkii reer Sodom iyo Gomorrah kuwa Ilaah aaminsan maahayn.
-Dadkii Sodom iyo Gomorra waxay ahaayeen dulli.

-Miyaa Ilaah arkay sharka dadka Sodom iyo Gomorrah?
-Haa.

-Miyaannu Ilaah ka qarin karnaa wax waliba ee aynu ku fakarayno?
-Maya.

-Myaannu Ilaah ka qarin karnaa wax waliba ee aynu niraahno Ilaah?
-Maya.

-Muxuu Ilaah u sheegay Aabraam kaddib markii Luut u guuray Berrimada wanaagsan?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 13:14-15 & 17

14-Oo Rabbigu wuxuu Aabraam ku yidhi, intii Luut ka guuray ka dib, Indhahaaga kor u taag, oo meeshaad joogto ka fiiri, xagga woqooyi iyo xagga koonfureed, iyo xagga bari iyo xagga galbeedba.
15-Waayo, dhulka aad aragto oodhan waxaan siin doonaa adiga iyo farcankaaga weligiin.
17-Bal kac oo ku dhex soco dhulka dhererkiisa iyo ballaadhkiisa, waayo, adigaan ku siin doonaa.

-Ilaah wuxuu leeyahay waxaan Aabraam siinayaa dhulka reer Kancaan oo dhan.

-Waaannu imminkana eegaynaa waxa Ilaah ku leeyahay haddana



Aabraam.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 15:5-6

5-Oo dibadduu u soo bixiyey, oo ku yidhi, Bal samada fiiri, oo xiddigaha tiri, haddaad tirin kartid; oo wuxuu ku yidhi, Sidaas oo kalaa farcankaagu ahaan doonaa.
6-Oo Rabbiga wuu rumaystay; Ilahna taas wuxuu ugu tiriyey xaqnimo.

-Ilaah wuxuu kaloo leeyahay Aabraam waxa ka soo farcami doona dad u badan sida xiddigaha.

-Meeqa xiddigood baa cirka laga arki karaa.
-Wax aan la xisaabi karin.

-Inkastoo Aabraam uusan lahayn carruur, Ilaah wuxuu ku leeyahay Aabraam farcankiisu uwuxuu u badanayaa sida xiddigaha oo kale.

-Inkastoo Aabraam aanu carruur lahayn, miyuu rumaystay Hadalkii Rabbiga?
-Haa.

-Aabraam wuxuu rumaystay Ilaah inuu maalin maalmaha ka mid ah ilmo siin doono.

-Aabraam wuxuu kaloo rumaystay in farcankiisa mid ka mid ah uu noqon doono Badbaadiyaha, kaasoo Ilaah u soo diri doono inuu dadyowga dhulka badbaadiyo.

-Aynu imminkana eegno waxa Ilaah ku leeyahay Aabraam:

Bal aynu akhrinno Bilowgii 15:13-16

13-Markaasuu wuxuu ku yidhi, Aabraam, Ogow in hubaal farcankaagu ay dad qalaad ku ahaan doonaan dal aan kooda haayn, oo ay u adeegi doonaan, oo afar boqol oo sannadood waa la dhibi doonaa.
14-Oo weliba quruuntaas ay u adeegi doonaan, xukun baan ku ridi doonaa; Oo dabadeedna way ka soo bixi doonaan iyagoo xoolo badan wata.
15-Laakiinse adigu nabad baad ugu tegi doontaa awowayaashaa, oo waxaa lagu xabaali doonaa adigoo cimri dheer gaadhay.
16-Oo iyagu qarniga afraad halkan bay ku soo noqon doonaan; waayo, dembigii reer Amor weli ma dhamma.

-Ilaah wuxuu Aabraam ku leeyahay farcanka adiga kaa soo baxa waxay ku noolaan doonaan dal qalaad, oo 400 oo sannadood kaddib, Ilaah Ilaah ku soo celin doonaa dhulkoodii Kancaan.

-Sidee baa Ilaah ku gartay waxa ku dhici doona faracii Aabraam?

-Ilaah wuu garanayey wax waliba ee faraca Aabraam ku dhici doona ka hor intii ayan dhalan.

-Miyaad garanaysaa waxa dhici doona berri?
-Maya.

-Miyaad garanaysaa waxa dhici doona bisha soo socota?
-Maya.
-Miyaad garanaysaa waxa dhici doona sannadka soo socda?
-Maya.



-Haddaba Ilaah waa garanayaa.

-Ilaah wuxuu garanayaa waxa inagu dhici doona berri.
-Ilaah wuxuu garanayaa waxa inagu dhici doona berri dambe.
-Ilaah wuxuu garanayaa waxa inagu dhici doona sannadka soo socda.

-Ilaah keliya ayaa garanaya waxa berri dhici doona.

-Markii Aabraam gaaray 99 sannadood, Yaa haddana Ilaah la hadlay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 17:1-5

1-Oo markuu Aabraam jiray sagaal iyo sagaashan sannadood, ayaa Rabbigu u muuqday, oo wuxuu ku yidhi, Waxaan ahay Ilaaha Qaadirka ah. Hortay ku soco, oo mid eel la' ahow.
2-Oo axdigaygaan kula dhigan doonaa, oo anigu aad baan kuu tarmin doonaa.
3-Markaasuu Aabraam wejiga u dhacay; oo Ilaah baa la hadlay isagoo ku leh.
4-Bal eeg, axdigaygii waa kula jiraaye, oo adigu quruumo badan baad aabbe u noqon doontaa.
5-Magacaagana mar dambe lama odhan doono Aabraam, laakiinse magacaagu wuxuunoqon doonaa Aabraam, waayo, waxaan kaa dhigay quruumo badan aabbahood.

-Ilaah wuxuu la hadlay Aabraam, wuxuuna siiyey magac cusub.
-Muxuu ahaa magaca cusub ee Ilaah siiyey Aabraam?
-Ibraahim.

-Maxaa Ilaah Aaraam u siiyey magac cusub.

-Wuxuu u siiyey waxay tahay in Ibraahim uu noqon doona aabbaha quruumo badan.

-Ilaah wuxuu kaloo Saaray siiyey magac cusub.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 17:15-16

15-Oo Ilaah wuxuu Ibraahim ku yidhi, Naagtaada saarayna magaceeda waa inaadan ugu yeedhin Saaray, laakiinse magaceedu wuxuu ahaan doonaa Saarah.

16-Oo iyadaan barakadayn doonaa, oo weliba wiil baan kaa siin doonaa; iyadaan barakaydan doonaa oo waxay noqon doontaa quruumo hooyadood; boqorrada dadyowguna iyaday ka iman doonaan.

-Muxuu ahaa magaca cusub ee Ilaah siiyey Saaray?
-Saarah.

-Waa maxay sababta Ilaah Saaray u siiyey magaca cusub?
-Waayo Saarah waxay yeelan doontaa farcan aad u badan.

-Weliba in kastaa Saarah ay madhalays ahayd, oo gabowday, Ilaah wuxuu ballanqaaday in Saarah ay noqon doonto hooyada qabiilooyin fara badan.

-Inkastoo weliba Saarah ay madhalays ahayd, haddana way da' weynayd, oo Ilaah wuxuu ballan-qaaday in Saarah ay wiil dhali doonto.

-Bal aynu haddaba isla eegno wixii Ibraahim sameeyey markii uu Ilaah ka helay ballan-qaadkaas.



Bal aynu akhrinno Bilowgii 17:17

17-Markaasuu Ibraahim wejiga u dhacay, oo qoslay oo qalbigiisa wuxuu iska yidhi, Ma ilmaa u dhalan doona nin boqol jira ah? Oo saarah oo sagaashan jir ihi miyey dhali doontaa?

-Maxaa Ibraahim u qslay?
-Ma wuxuu u qoslay inaanu rumaysnayn Rabbiga?
-Maya.

-Aabraam wuxuu u qoslay waxay ahayd inuu garanayey inuu boqol jir ahaa, saarahna ay sagaashan jir ahayd, oo welibana Ilaah doonayo inuu iyaga siiyo wiil.

-Miyaa Ilaah awoodaa inuu ubad siiyo nin boqor jir ah, iyo haweenay ma-dhalays ah oo iyana sagaashan jira ah?
-Haa.

-Ma wax Ilaah ku adag baa jira?
-Maya.

-Kuma ayaa abuuray ninkii kowaad?
-Ilaah.
-Kuma ayaa abuuraynaatii kowaad?
-Ilaah.
-Kuma ayaa ialmaha dhasha siiyey neeftii nolosha?
-Ilaah.

-Ma waxaa jira sheey Ilaah aanu samayn karin?
-Maya.
-Ilaah wuxuu ubad siin karaa nin boqol sannadood jira, iyo haweenay sagaashan sannadood jirta oo weliba ma dhalays ah.